

# Baadhitaanka Maqaarka ee Tiibayda


## Waa maxay tiibay?

"TB" waa marka la soo gaabiyo magaca cudurka la yidhaahdo tiibay ama tiibisho ama qaaxo.



## Sidee baa lagu qaaday tiibayda?

Tiibayday waxa fidiya jeermi yaryar oo hawada sabeyn kara. Marka qof qaba cudurka tiibaydu uu qufaco, hindhiso ama qayliyo waxa uu hawada ku saydhin karaa ama ku sii dayn karaa jeermiga. Haddii qof kale neefsado jeermiga, waxa ku dhici kara tiibay. Tiibaydu waxa kaa dhigi kartaa qof daallan ama tacbaan ah, waxay kugu ridi kartaa qufac, qandho iyo dhidhid habeenkii ah. Dadka intooda badani waxay u maleynayaan in tiibaydu kaliya waxyeelayso sambabadooda. Inkastoo 70% dadka qaba tiibay uu jeermigu ku jiro sambabadooda, waxa kale oo tiibaydu waxyeelayn kartaa meelo kale oo jidhka ah sida lafaha, maskaxda ama kalyaha.



## Sidee baan ku ogaan karaa haddii aan qabo tiibay?

Baadhitaan maqaarka ah oo fudud ayaa sheegi karaa haddii jeermiga tiibaydu ku jiro jidhkaaga. Waxa caadi ahaan kaa lagu sameeyaa cududda. Irbad yar ayaa la isticmaalaa si dheecaanka baadhitaanka loo galiyo maqaarka hoostiisa. Shaqaale caafimaad ayaa eegi doona sida meeshu noqoto 2 ama 3 maalmood ka dib.

## Sidee baan u daryeelaa cududdayda ka dib baadhitaanka?

- Meesha ha ku daboolin faashad ama sharooto.
- Ha xoqin ama xagan meesha.

## Ka waran haddii baadhitaanka maqaarku aanu waxba sheegin?

Inta badan, haddii meesha dheecaanka baadhitaanka lagu muday aanay soo buurnaan ama soo fuurin waxay u badan tahay inaan tiibay ku soo gaadhin.

## Ka waran haddii baadhitaanku wax sheego?

Marka baadhitaanku wax sheego waxa la arki doonaa meel soo buuran ama fuurtay oo ku taala meeshii cududda laga galiyay dheecaanka baadhitaanka. Taa macnaheedu waxa weeye waxay u badan tahay in jeermiga tiibaydu ku jiro jidhkaaga. Waxa laga yaabaa in dhakhtarku damco inuu sameeyo baadhitaano kale si uu u arko meesha jeermigu jidhka kaga jiro.

Waxa muhiim ah in dhakhtar ama kalkaalisoo arko barta baadhitaanka maqaarka 48-72 saacadood ka dib markii la sameeyay.

## Ka waran haddii la i siiyay talaalka BCG?

*Xiitaa haddii lagu siiyay talaalka BCG, waxa lagaa qaadi karaa baadhitaan tiibay oo maqaarka ah.*

- Dadka la siiyay talaalka BCG waxa suurogal ahaan wali soo gaadhi kara ama gali kara jeermiga tiibayda.

## War Fiican!

Haddii aad og tahay inaad qabtid jeermiga, waxa aad qaadan kartaa dawo si jeermiga loola dagaalamo oo aad u heshid caafimaad.



BPHC, TB Clinic, BMC Yawkey Bldg. 3<sup>rd</sup> Floor  
850 Harrison Ave.  
Boston, MA 02118

Teleefon: (617) 534-4967 (Ballamaha)  
(617) 534-4875 (Kalkaalisada)

SOMALI